

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sannadkii 11aad

Cadad Gaar ah

*Tariikhda Daabacada
07/01/2023*

FAAFINTA RASMIGA AH EE
SADDEX BILOOD-LAHA AH
OCTOBER TO DECEMBER

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web: www.garyaqaankaguud.com

TUSMADA CADADKA

**QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA
CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:**

1. Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta,
Xeer Lr. 102/2022(Cadad gaar ah)

QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:

- | | | |
|-----|--|----|
| 2. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Cafis | 3 |
| 3. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 4 |
| 4. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Aaga Seero-badeedka Berbera | 5 |
| 5. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Cafis | 6 |
| 6. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 8 |
| 7. | <u>Xil Ka-Qaadis</u> | 9 |
| 8. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 10 |
| 9. | <u>Xil Ka-Qaadis</u> | |
| 10. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 11 |
| 11. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid Guddi | 12 |
| 12. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Diiwan-gelinta Cod-bixiyeyaasha | 13 |
| 13. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Miisaaniyad Sannadeedka 2023-ka | 15 |
| 14. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 16 |
| 15. | <u>Xil Ka-Qaadis</u> | 17 |

**QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA,
XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIHOJOYINKA
DOORASHOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:**

16. Xeer-nidaamiyaha Hababka Lacag
bixinta iyo Hawlwadeenada Hababka Lacag
bixinta, Xeer-nidaamiye Lr. 01/2022(Cadad
gaar ah)

QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

17.	<u>Maxkamadda Sare JSL</u> Go'aan Maxkamadeed QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:	20
18.	SOOMA BIXIN	

QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/222-949/102022

Taar: 12/10/2022

Wareegto Madaxweyne **Cafis**

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland, Qodobka 90aad,
Xubintiisa 5aad;

Markaan Arkay: Xeerka Ciqaabta Guud,
Qodobkiisa 144aad;

Markaan Tix-galiyey: Qoraalka Xeer-ilaaliyaha Guud
ee Qaranka ee summaddiisu
tahay XIG/JSL/362/2022, Kuna
taariikheysan 06/10/2022;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey:

In laga bilaabo taariikhda maanta aan cafis u fidiyo Yaxye Ciise
Maxamuud oo ka mid ah maxaabiista xukuman.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-946/102022

Taar: 18/10/2022

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland,

Markaan Arkay: Aqoonteeda, Kartideeda iyo
Waayo-aragnimadeeda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan karto
Masuuliyadda ka dhalanaysa
Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aansaday;

In Amaal Cabdillaahi Cawil Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado La-taliyaha Arrimaha Sharciga ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-952/112022

Taar: 08/11/2022

Wareegto Madaxweyne

Aagga Seero-badeedka Berbera

Markaan Arkay: Qodobka 18aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Ku Qancay: War-bixinta ku saabsan in Shacaabiga Xeebta Berbera uu hoy u yahay in ka badan 70 nooc oo ka mid ah noolaha badda, kuwaasi oo isugu jira Dhir iyo Xayawaan yaryar oo nadir ku ah Dunida;

Markaan Dersay: In hawsha dhismaha wajiga labaad ee mashruuca ballaadhinta Dekedda Berbera ay khatar galin karto noolaha badda ee ku nool Shacaabiga Aagga Dekedda Berbera, sidaa daraadeedna ay lagama-maarmaan noqotay in laga raro noolaha ku jira shacaabiga u dhow Dekedda si loo badbaadiyo taranka noolahaasi;

Markaan La-tashaday: Mas'uuliyinta ay khusayso;

Waxaan Go'aamiyey:

- 1) In xeebta galbeedka ka xigta Dekedda Berbera, kana bilaabanta: 1. $10^{\circ} 24'16.70''\text{N}$; $44^{\circ} 55'16.00''\text{E}$ 2. $10^{\circ}25'28.00''\text{N}$; $44^{\circ}55'16.00''\text{E}$; kuna eeg: 3. $10^{\circ}25'53.00''\text{N}$; $44^{\circ}49'48.00''\text{E}$ 4. $10^{\circ}24'40.80''\text{N}$; $44^{\circ}49'47.60''\text{E}$ sida ku cad khariiradda wareegtadan ku lifaaqan (Aaga 3aad) laga bilaabo taaiikhda maanta uu noqon doono Aaga Seero-badeedka Berbera (Berbera Maritime Protected Zone).
- 2) In noolaha ku nool Shacaabiga Aaga Ballaadhinta Wajiga Labaad ee Dekedda Berbera loo raro Aagga Seero-Badeedka Berbera.
- 3) In ay mamnuuc tahay in dhul laga bixiyo ama dhismayaal laga sameeyo Dhulka Xeebta u jira 220-meter (Laba Boqol iyo Labaatan Talaabo) oo ka bilaabanta Xeeliga Badda.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-953/112022

Taar: 10/11/2022

Wareegto Madaxweyne

Cafis

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad}, Faqraddiisa 5^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qoraalka Talista Guud ee Ciidanka Asluubta ee summaddiisu tahay TCA/G-1/347/2022, kuna taariikhaysan 07/11/2022, ujeeddadiisuna tahay soo-gudbin Maxaabiista Cafiska Galaya Sannadkan 2022-ka;

Markaan Tix-galiyay: Qoraalka Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee summaddiisu tahay XIG/JSL/392/2022, Kuna taariikheysan 08/11/2022 u jeeddadiisuna tahay soo-jeedin cafis guud;

Markaan La-tashaday: Hay'adaha Ay Khusayso;

Waxaan Go'aamiyay:

In laga bilaabo taariikhda maanta aan Cafis Guud u fidiyo maxaabiista dembiyada fudud ku xukuman ee xabsida Dalka ku xidhan oo tiradoodu dhan tahay 594 (Shan Boqol iyo Afar iyo Sagaashan) maxbuus. Cafiskani saamayn kuma laha xuquuqda madaniga ah iyo raadka ciqaabeed ee ka dhalanaysa dembiyada ay ku xukunnaayeen.

Waxa cafiskan fulinaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo la raacayo liiska Maxaabiista ee halkan ku lifaaqan.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-961/112022

Taar: 23/11/2022

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waaya-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan karo masuuliyadda
ka dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey:

In Cabdiraxmaan Jaamac Hayaan Hoorri laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-958/112022

Taar:23/11/2022

Ku: Xasan Axmed Aadan;
Xeer-ilaaliyihii Guud ee Qaranka

Ujeedo: Xilka-qaadis

Mudane,

Laga bilaabo taariikhda maanta waxaan go'aansaday in aan kaa-nasiyo xilkii Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

Sidaa darteed, waxaan kaaga mahad-celinayaa dedaalkii iyo hawl-karnimaddii aad muujisay muddadii aad haysay xilka Qaranka.

Waxa aan kuu rajaynayaa Caafimaad taam ah iyo mustaqbal wacan.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-960/112022

Taar: 23/11/2022

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Aqoonteeda, Kartideeda iyo
Waayo-aragnimadeeda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan karto masuuliyadda
ka Dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Aamina Cilmi Fariid Badeed laga bilaabo taariikhda maanta ay ahaato Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgshiga iyo Warshadaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-959/112022

Taar:23/11/2022

Ku: Cabdillaahi Cabdiraxmaan Aare;
Wasiirkii Wasaaradda Hormarinta Maalgashiga iyo
Washahadaha JSL

Ujeedo: Xilka-qaadis

Mudane,

Laga bilaabo taariikhda maanta waxaan go'aansaday in aan kaanasiyo xilkii Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshahadaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Sidaa darteed, waxaan kaaga mahad-celinayaa dedaalkii iyo hawl-karnimaddii aad muujisay muddadii aad haysay xilka Qaranka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-962/122022

Taar: 06/12/2022

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 9^{aad} ee Xeer
Hoosaadka Jaamacadda
Hargeysa;

Markaan Tix-geliyey: Muhiimadda Dhismaha
Guddida Saree e Jaamacadda
Hargeysa u leedahay Maamulka
iyo Horumarinta Jaamacada
Hargeysa;

Markaan Arkay: Aqoontooda, Kartidooda iyo
Waayo-aragnimadooda;

Markaan Ku Qancay: In ay Hanan Karaan
Masuliyadda ka-dhalanaysa
Xilkan;

Waxaan Go'aamiyey:

In laga bilaabo taariikhda maanta aan u magacaabo xubnaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin in ay noqdaan Guddida Sare ee Jaamacadda Hargeysa:

Tir	Magaca	Xilka
1.	Dr. Sacad Cali Shire	Guddoomiye
2.	Ibraahin Daahir Dubed	Guddoomiye Ku-xigeen
3.	Eng. Mustafe Axmed Cabdillaahi	Xubin
4.	Dr. Amaal Cabdillaahi Cawil	Xubin
5.	Maxamed Baaruud Cali	Xubin
6.	Mustafe Maxamed Khayre	Xubin
7.	Cabdixakiin Maxamed Cabdi	Xubin

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Ku: Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Aw-qafta Guddoomiye

Ku: Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyada Xubin

Ku: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Xubin

Ku: wasiirka Wasaaradda Caddaaladda Xubin

Ku: Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhiga Xubin

Ujeeddo: **Magacaabid Guddi**

Sida aad la socotaan Magaha iyo xaqida qoomaha Dawladda loo raaco waxa lagama-maarmaan noqotay in la middeeyo Hab-raacooda iyo xeerarka sharci ee dhinaca shareecada.

Sidaa darted, waxaan idiin magacaabay inaad noqotaan Guddiga soo-dhamaystirka hawlaha qabyada ka ah. Guddida waxa guddoomiye u noqon doona Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqafta.

Guddidu marka ay hawshaas soo dhammaystirto waxa la-wareegi doona Maamulka Magaha iyo Xaqidda qoomaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249/964/122022

Taar: 11/12/2022

Xeer Madaxweyne Lr.18/122022

Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 44^{aad} ee Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr.91/2020;

Markaan Helay: Qoraalka Soo-jeedinta ee komishanka doorashooyinka Qoraalka ee summaddiisu tahay KDQ/XK-6/019/2022, kuna taarikhaysan 07/12/2022 ujeeddadiisuna tahay, ku-dhawaaqidda Diwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha;

Markaan ku qancay: Soo-jeedinta wakhtiga qabashada Diiwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Doorashooyinka ee

komishanka Doorashooyinka
Qaranka;

Waxaan Go'aamiyey;

In Diwaan-gelinta Cod-bixiyeyaasha Doorashooyinku ka-bilaabanto Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliland Maalinta Arbacada ee taariikhdu tahay 28/12/2022.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-966/122022

Taar: 17/12/2022

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2023-ka

Markaan Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay:

Qodobka 75aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay:

Go'aanka Golaha Wakiillada
Go'aan Lr.GW/KF-
04/956/2022 ee ku taariikheysan
03/12/2022, kuna ansixiyeen
Miisaaniyadda Sannadka 2023-
ka.

Waxaan Go'aansadey;

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2023-ka oo ka kooban Miisaaniyadda Dawlada dhexe, Dawldaha Hoose Hay'adaha Madaxa-banaan iyo deeqaha Caalamiga ah oo dhan SL.SH/= 3,581,440,706,340/= (Saddex Tirilyan, Shan Boqol Kow iyo siddeetan Bilyan, Afar Boqol iyo Afartan Milyan, Toddoba Boqol iyo Lix kun, Saddex Boqol iyo Afartan Shillin Somaliland ah). Miisaaniyaddu waxay dhaqan-gal noqon doontaa 01 January 2023.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-971/122022

Taar: 26/12/2022

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad} ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waaya-aragnimadiisa;
Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo
Masuuliyadda ka Dhalanaysa
Xilkan;
Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey:

In laga bilaabo tariikhda maanta aan Saleebaan Diiriye Cabdi Ibraahim u magacaabo Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Sool ee Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-970/122022

Taar: 26/12/2022

Ku: Maxamed Aaden Cumar
Guddoomiye ku-xigeenkii Gobolka Sool
Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Ujeedo: Xilka-qaadis

Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisu tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado cidii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taarikhda manta aan kaa qaado xilkii aad hasay.

Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad haysay xilka qaranka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA AFRAAD:

GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA

JAMHUURIYADA  SOMAALILAND
MAXKAMADDA SARE

Supreme court

المحكمة العليا

MS/MS/115/2022

21/11/2022

KU: URUR SIYAASADEEDKA TALO-WADAAG HARGEYSA
KU: GUDDIGA DIIWAANGELINTA URURADA HARGEYSA
KU: GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL HARHEYSA
KU: XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA HARGEYSA
OG: MADAXWEYNAHA JSL HARGEYSA

UJEEDDO: GUDBIN XUKUN MAXKAMADEED

Waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa xukunka simadiisu tahay MS/115/2022 ee ku taariikhaysan 17/11/2022 kuna saabsan Dacwadda idaariga ah ee ka dhexaysa dhinacyadan:

RAFCAANLE: Urur siyaasadeedka Talo-wadaag

WAKIIL: Guddoomiyaha Urur Siyaasadeedka Talo-wadaag

RAFCAANSANE: Guddida Diiwaan gelinta Ururada
Siyaasadda Iyo Ansixinta Axxaabta
Qaranka

WAKIIL: Gud.GDUS & AAQ

Sidaas daraadeed waxaa la idin farayaa sida ku cad Xukunka Makamadda Sare JSL ee halkan aan idiinku gudbinay in Urur siyaasadeedka Talo-wadaag ku dartaan Liiska Ururada gudbay ee loo gudbinayo komishinka Doorashooyinka Qaranka.

Allaa Mahadleh

Aadam.X. Cali Axmed

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE EE JSL AHNA

GUDDOOMIYAHA GUDDIGA CADALADDA.

JAMHUURIYADA



SOMAALILAND

MAXKAMADDA SARE JSL

المحكمة العليا

Supreme court

Ref: MS/115/2022

17/11/2022

Qaybta Dacwadaha Idaariga ah

Rafcaanle: - urur siyaasadeedka Tal-wadaag

Wakiil: - Guddomiyaha Urur Siyaasadeedka Talo-wadaag.

Qareen: - Maxamed Saalax Cige.

RAFCAANSANE: Guddida Diiwaan gelinta Ururada
Siyaasadda Iyo Ansixinta Axxaabta
Qaranka

WAKIIL: Gudoomiyaha GDUS & AAQ

Guddida Garsoorka:

- | | |
|-------------------------|------------|
| 1. Aadam X. Cali Axmed | Guddoomiye |
| 2. Maxamed Cumar Geelle | Xubin |
| 3. C/raxmaan xasan nuur | Xubin. |

Maanta oo ay taariikhdu tahay 15/11/2022 Maxkamadda Sare ee JSL oo ka kooban Guddida Garsoorayaasha kala ah:

- | | |
|-------------------------|------------|
| 1. Aadam X. Cali Axmed | Guddoomiye |
| 2. Maxamed Cumar Geelle | Xubin |
| 3. C/raxmaan xasan nuur | Xubin. |

Oo uu kaalinayo kaaliyaha Maxkamadda sare JSL Cumar C/wahaab Siciid, waxa ay u fadhiisatay dhagaysiga dacwada idaariga ah ee sumadeda iyo dhinacyadeeduba sare ku xusan yihiin dhammaan dhinacyada dacwaduna waa goob jog maxkamaddu way furan tahay.

Dood afeedka rafcaanlaha urur siyaasadeedka talo-wadaag wakiil (guddomiyaha ururka Talo-weadaag (Ibraahim Mahdi Buubaa)

Waxaan ayid sanahay asbaabtayda Rafcaan waxaan ku durayaa Guddidu waxa uu nagu soo eedeeyey in aanu ku dhacnay afar qodob anigoo eediisa tix-raacaya waxaa ku jirtay in aanu samaynay been abuur aanu ku samaynay liisaskii aanu soo gudbinay ee gobollada taasina waa waxba kama jiraan haday taasi jirtan way noo yeedhilahaayeen sida uu dhigay Qod:21aad ee xlr 14 ama ganaax ayayna saari lahaayeen wxaanu qodobkaa aan soo sheegay waajibinayaa in naloo yeedho noomanay yeedhin guddidu taasina waxay muujinaysain eeda ay soo jeediyeen aanay waxba ka jirin ,waxa kale oo ay Guddida u sheegeen in aanan soo gudbin buugaagtii diiwaanada ee gobollada M/jeex iyo tog dheer taasina way waxba kama jiraan haddaa ka hadlo eeda ay nooga soo jeediyeen gobolka saaxil ee ah in aanu soo gudbin buugii

muwaadinka taana waxan kaga jawaabayaa noomay nagumana soo wargelin,waxaan halkan ku haynaa cadayn Vidio oo tilmaamaysay in guddoomiyuhu guddidu leeyahay gobolka saaxil wixii la idinka baahnaa waad dhammaystirteen.eeda kale ee ay leeyihiin gobolka awdal 1000 qof waa la tirin kari waayay waxaan haynaa caddaynteed oo dhammays tiran oo tilmaamaysa in si degenaan ah loo tiriyeey dadkii 1000 qof ahaa video ayaanan ka hayna, waxaan halkan ku soo gudbinaynaa dhukumantiskii ay noo saxeexeen Gudigu ee dhammaan gobolada dalka waxaan ku soo ururinayaa labadqodob ayaa ugu muhiimsan xlr14 1) in xisbiga looga baahanyahay in ay 1000 qof la yimaadaan waana la nimi 2) in xafiisyada ururku lag helo gobol kasta taana waanu la nimi sidaa daraadeed waxaan maxkamada ka codsanayaa 1)in la ogolaado asbaabtayada Rafcaan 2) in la diido jawaab celinta rafcaansanaha 3) in la baabiiyo g,aanka gudigu soo saaray oon ahayn mid shrciya.

Dood afeedka rafcaansanaha GDUS& AAQ

Wakiil: - guddoomiyaha GDUS&AAQ (siciid Maxamed Cilmi)

Dood rafcaanluhu waa laba qaybood mid qoraal ah iyo mid af ah.waxaan kaga jawaabayaa kala saariddaa ururada waxaa lagu kala saarayaa xeerlr 14 waxaanu guddoomiyuhu ka hadlay Qod:21aad xeer lr:14 sida uu dhigayaana maaha umana qorna waxa keliya ee qodobku ka hadlayaa waa ganaax xerkuna ma qorayo 1000 la taabto sida uu dhigayo qodobka 5aad Xarafkisa (T)Ee xeer Lr 14,waxaana ururada waajib ku ah sida uu dhigayo xeerku in ay noo soo gudbiyaan Cadaynta 1000qof arrinka attabashaduna waa baroosiijar sidaa daraadeed annaga oo xeerka ilaalinayna waxaa waajib ah in aanu hubino caddymaha ay noo soo gudbiyaan ururaducadaymihii ay noo soo gudbiyeena ururka talo wadaag boqolkiiba 45 waxay noqdeen been abuur,muwaadniinta inta aan kaadhka lahayna waxaa loo raacayaa

Xeer Lr;91oo uu dhigayo qodobkiisa 40 aad muwaadnka waxaa ka reeban in uu qaato wax ka badan hal kaadh,ururka talaowadaagna wax uu soo gudbiyey dad qaatay kaadhadh badan oo been abuur ah tusaale hal qof ayaa shan jeer kaadh qaatay sida ka muuqata caddayntooda waxaanay taasi ka dhalanaysa khiyaamo sida uu dhigayo qod:373 XCG waxa kale ooy ka hor imanaysaa qod:7aad ee Xlr14 Gobolka Sanaag iyo gobolka saaxil ayaanay aad ugu badanyihiin arrinta aan soo sheegay,Arrinta gobolka M/jeex waxaa waajib ku ah xafiiska ururka talowadaag in uu yaalo diwaanka buuga ay ku qoran yihiin magacda muwaadiniinta qaab hab raacna waan siinay sawirka ay soo gudbiyeena maaha Buugii diwanka manay cadayn,waraaqa ay soo gudbiyeena anigu kuma saxeexni waxaana waajib ah in guddomiyuhu ku saxeexnaado marka uu hubiyo haddaan ku noqdo gobolka togdheer halka waxa ku hayaa warbixita sheegaysa in aanu ururku la iman cadaynta1000 qof, aniga oo hadalka soo ururinaya waxaan maxkamada usoo gudbinayaa warbixinta gobolka awdal oo dhammays tira. Hadhitaanka uu hadhay ururka talo-wadaag waa mid sharci. waxaanan maxkamadda ka codsanayaa inta iigu qoran jawaab celintayda

Asbaabtii Xukunka

MAXKAMADA SARE JSL: -

Markay aragtay Galdacwadeedka idaariga ah ee sumaddiisu tahay MS/115/2022 ee ka dhexeeya dhinacyadan: -

Rafcaanle: - Urur siyaasadeedka Talo- wadaag

Wakiil: - Guddomiyaha Urur Siyaasadeedka Talo-wadaag.

Qareen: - Maxamed Saalax Cige.

Rafcaansane: Guddida Diiwaan gelinta Ururada Siyaasadda Iyo Ansixinta Axxaabta Qaranka

Wakiil: Gud.GDUS & AAQ

Markay aragtay: Asbabta Rafcaanka Rafcaanlaha eek u taariikhaysan 09/11/2022 Ee uu Maxkamadda sare JSL usoo gudbiyey gudoomiyaha urur siyaasadeedka talo wadaag nuxurkiisuna yahay sidan:

1. Maxkamadda sharafta leh taariikhdu markay ahayd 06/11/2022 wax ay Guddida diiwaangelinta Ururradu ku dhawaaqday natiijadii kala saarista ururada siyaasada waxaanay sheegtay in Ururka siyaasadeedka talo-wadaag ee aan Gudoomiyaha ka ahay uu buuxin waayey shuruudihii diiwaan galinta Ururada siyaasadda. Taasina wax allaale wax ka jiraa ma jirin sababta oo ah Qod:2aad (4iyo 5) ee xeer Lr 14/2011 waxa uu tilmaamayaa: -
 - A. In Xisbiyada Qaranka iyo Ururada lagu maamulayo si waafaqsan xeerkan isla markaana aan ka soo horjeedin shareecada Islaamka. Dastuurka Qaranka, Xeerarka Dalka iyo Xeerarka Xisbiyada ama ururada
 - B. In cid kasta oo reer soomaaliland ah oo buuxisa shuruudaha xeerkan ay xaq u leedahay in ay samaysato Urur siyaasadeed si waafaqsan xeerkan Hadaba Urur siyaasadeedka Tal-wadaag isagoo dhammaan waajibaadka xeerku

dhigayay gudanaya waxa uu ugu horayn buuxiyey oo uu guddida u gudbiyey codsigii diiwaan gelinta iyo qabashada araaajida si waafaqsan Qod.4(1.2&3) (B,T,J,X,KH &D)islamarkaana ururku waa uu ka gudbey wareegii koowaad waxaanay guddidu siisay shahaadadii ku meel gaadhka ahayd ee ururku ku hawl gelayey .

2. Intaa kadib waxa uu ururku u gudbay marxaladii wareega labaad ururkuna si waafaqsan Qod 5aad ee xeer Lr14/11 ee faqradiisa 1aad,2aad,3aad ilaa iyo faqradiisa 10aad,waxa aanu gudida u gudbinay wax kasta oo uu xeerku nagu waajibiyey inaanu qabano ama u gudbino Gudida ururad iyo Axsaabta Qaranka Markasta oo aanu Dukumenti u gudbinana guddidu way naga qabanaysay ,wayna nooga mahad celinaysey wax ay nagu soo celiyeena ma jirin.Gobol katana waxaa nooga furaa xafiisyo shaqeeya oo leh hawl wadeeno ka hawl gala mid kastana guddidu way soo aragtay.
3. Sidoo kalen shuruudii ahayd madax taabashada 1000 qof ururku wuu buuxiyey isla goobta ayaanay guddidu noogu saxexday in aanu shuruudihii buuxinay.
4. Hadaba waxaa wax lala yaabo ah sababaha ay guddidu u cuskatay go'aankeeda waayo? waxa ay guddidu sheegtay in lisaskii aanu gudida u gudbinay ee gobollada dalka uu ku jiro been abuur badan. Taasna wax allaale wax ka jiraa ma jiraan, sababtoo ah guddidu waxa ay

cadayn lahayd gobolka uu ka dhacay been abuurku iyo waxa uu yahay. Sidoo kale hadii ay run tahay in ay heleen been abuur way noo yeedhi lahaayeen waxyna na saari lahayd ganaaxa uu tilmaamayo qodobka 21aad ee xeer Lr 14/11.sidaas darted waxaa cad in aanay Eedaasi waxba ka jirin.

5. Sidoo kale arrinta ay guddidu ka sheegtay buugii diiwaanka ururka ee gobolka M/jeexiyo togdheer iyo arrinta ay xafiiska Gobolka saaxil ka sheegtay ee ah in aanu oolin diiwaankii muwaadiniintu (IDCard). wax allale wax ka jiraa ma jiraan. Cadaymeheedii oo dhamays tiran waaanu haynaa.
6. Dhinac kale Eedoda ku saabsan tirinta kunka qof ee gobolka awdal ee ay sheegeenin la tiring kari waayey iyana waa been cad. waxaana caddayn ugu filan dhukumantigii ay goobta noogu saxeexeen oo aanu hayno, kaasi oo ay ku caddahay in ay noo tiriyeen 1,142 qof, sidaas darted waxa aanu Maxakamada sharafta iyo qadarinta mudan ka codsanaynaa
 - In ay naga aqbasho asbaabtayada rafcaan qaadasho.
 - In ay diido jawaab celinta Guddida Diwan gelinta Ururada iyo axsaabta Qaranka
 - In ay buriso go'aanka guddida eek u taariikhaysan 06/11/2022 wixii naga khuseeya.

- In ay soo saarto go'aan cadaalad ah islamarkaana ay qaraariso In ururka talo-wadaag uu buuxiyey dhamman shuruudihii looga baahnaa. una gudbay in uu ka qayb galo doorashada tooska ah ee ururada iyo axsaabta Qaranka.

Markay Aragtay: jawaab celinta asbaabta rafcaanka rafcaansanaha ee ku Taariikhsa 14/11/20022 ee uu Maxkamadda sare JSL u soo gudbiyey Guddoomaha gudida diiwaan Galinta Ururada Siyaasada iyo ansixinta Axsaabta Qaranka JSL. nuxurkiisuna yahay sidan:

1. Hawsha diiwaan gelinta Ururada Syaasadda & kala saaristooda waxa saldhigu ah xeer Lr. 14/2011 iyo Habraacyada Gudida diiwaangelintu samayso ee aan xeerka ka hor- imanayn.
2. GDUS &AAQ Waxay Ma gudbanimada Ururka Talwadaag u cuskatay Qodobada 5aad iyo 7aad Ee Xeer Lr 14/2011. Xeerka habdhaqanka Ururada /axsaabta Siyaasadda, iyo Hagaha Hubinta xafiisyada iyo kunka Qof (Lifaaqyo) Oo lagu hubiyey Natiijada ka soo baxday Baadhista iyo kormeerka GDUS&AAQ.
3. Waxaa GDUS&AAQ u Cadaatay cadaymahoodiina Maxkamadda u soo Gudbin doonaa in ururka Talo Wadaag ku kacay inuu Ka been abuur Magacyada iyo kaadhahka Wuxuu ku sheegay Xubno Oo Uu donayay inuu GDUS&AAQ ku marsiiyo inay yihiin kunkii Qof Ee cadymooda laga Doonayey Sida ku xusan qodobka 5aad Ee Xeer Lr. 14/2011. sidoo kale, isla xubnaha ururku ku Sheegay inay gobol uga diiwaan gashnyihiin aya uga diiwaan gashan gobollo kale iyado

si cad ay usoo noqnoqotay ka been abuuridda aqoonsiyada Xubnaha, taasi waxy si toosa ah uga soo horjeedaa Nidaamka Guud Ee Diiwaangelinta ururada sida ku Cad Qodobka 7aad Ee xeer Lr.14/201.Waxayna jebinaysaa Qodobka 373 Ee Xeerka Ciqaabta Guud.Sidaas darted GDUS&AAQ, waxayu aragtaa in been abuurka kaadhahka iyo liiska Xubnaha ee Goboladu yahay

I- Inaanu Ururka Buuxin waaya shuruudmuhiim ah Inuu GDUS&AAQ.usoo gudbiyo cadaymaha kun qof ee gobol kasta Oo leh Aqoonsi

II-Inuu gef Ciqabi ka dhalan karto ku Galay Been abuurka Uu ku kacay.

4- waxaa GDUS&AAQ u cadaatay, Cadaymahoodiina Maxkamadda U soo Gudbin doonaa, in uu Ururka Talwadaag ku dhacay asbaabahan Muhiimka ah Xafiisyada Gobolada Oo ah:-

I- Inaanu kujirin Diwaanka Xubnaha Ururka Ee Gobolada Maroodijeex & Togdheer.

II-Inay jiraan Aqoonsiyada Xubnaha Ururka Gobolka Saaxil

5. Gobolka Awdal Tirintii Xubnaha wa la buriyay ka dib markii loo diwaan geliyey in ururku ku kacay Carqaladayn inuu Tiro isku mid ah isu warwareejiyey (Isuguurguurid) taasoo sababtay inay suurtoagal u noqon weydo Guddiga Xaqiijinta tirade, Sidaas Darteed Waxaan Maxkamadda sharafta leh ka codsanaynaa.

❖ Inay aqbasho Go'aanka GDUS&AAQ.ee Ma gudbannimada ururka Talo-wadaag.

❖ Inay Diido asbaabta Dacwoodooda Rafcaanka Ee Ururka Talo-wadaag.

❖ Inay Go'aan ka soo saarto Been |Abuurka Uuu Ku Kacay ururka Talo-wadaag.

Markay derstey: - Go'aanka ku Taariikhaysan 06/11/2022 Ee ka soo baxay Gudida diwaangelinta Ururada siyaasada iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka JSL, kaas go'aamiyey in Urur siyaasadeedka Talo-wadaag aanu Gudbin.

Markay Aragtey: - Qodobka 5aad ee Xeerka Nidaamka Axsaabta Iyo ururada Siyaasadda, Xeer Lr.14/2011 oo sheegaya shuruudaha looga baahanyahay xisbiyada /ururada siyaasadda.

Markay Aragtay: - Qodobka 7aad ee Xeerka Nidaamka Axsaabta Iyo ururada Siyaasadda, Xeer Lr.14/2011 oo sheegaya waxyaabaha ka reeban xisbiyada/ururada siyaasadda oo ay ka mid tahay in ay Gudidu usoo gudbiyaan warbixi been ah ama Khaldan.

Markay u caddaatay:- in aanay guddidu maxkamadda usoo gudbin wax ay ku caddayn karto in urur siyaasadeedka Talo-wadaag warbixin been ah ama khaldan usoo gudbiyey, in kastoo goddomiyaha Guddidu maxkamadda horteeda kaga dooday in urur-siyaasadeedka Talo-wadaag usoo gudbiyey liisas been abuur ah oo kaadhhdhka jinsiyadda iyo kuwa codbixiyeyaasha isugu jira maxkamaddana u soo gudbiyey shax ay

ku qoran yihiin magacyo isu eg oo tiro badan balse dhokumentiyadaa ay soo gudbiyeen ma ahayn dhokumentiyadiyo qiimo sharci leh oo ka soo baxay hay'adihii ay khusaysey ee kadhadhka aqoonsiga iyo codbixiyeyaasha bixiyay sida wasaaradda Arrimah Gudaha JSL iyo komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL.

Markay deristey: -

Dhammaan dhokumentiyada kala duwan ee ay dhinacyadu maxkamadda usoo gudbiyeen isla markaana lafo gurtay isla markaana ku qanacday in aany jirin wax caddayn ah oo loo cuskan karo in urur siyaasadeedka Talowadaag aanu u gudbin tartanka doorashada axsaabta qaranka JSL.

Markay aragtay: -

qodobada 10,246,259, XHM iyo Qod: 2aad,5aad, 7aad iyo dhammaan asbaabta sare ku xusan awgeed waxay maxkamaddu soo saartay xukunkan:

Jamhuuriyadda Somaliland

Magaca Ummadda Somaaliland

Maxkamadda Sare JSL

Xukunka Maxkamadda

Makamadda Sare JSL: -

1. Waxay ogolaatay asbaabta rafcaanka eek u taariikhaysan 09/11/2022 ee uu maxkamadda sare JSL usoo gudbiyey Urur siyaasadeedka Talo-wadaag iyo dood afeedkoodii.
2. Waxay diiday jawaabcelinta asbaabta rafcaanka eek u tariikhaysan 09/11/2022 ee ay maxkamadda Sare JSL usoo gudbiyeen Guddida Diiwaangelinta Ururrada siyaasadda iyo ansixinta Axxaabata Qaranka JSL iyo dood afeedkoodii.
3. Waxay Xukuntay in urur-siyaasadedka Talo-wadaag u gudbey tartanka doorashada Axxaabta Qaranka JSL.
4. Waxaa la farayaa Guddida Diiwaan Gelinta Ururada siyaasadda Iyo Ansixinta Axxaabta Qaranka JSL in ay urur-siyaasadeedka Talo-wadaag ku daraan liiska ururada gudbay ee loo gudbinayo Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL si uu uga qayb qaato doorashada axsaabta qaranka JSL.
5. Xukunkani wuxuu soo baxay manta oo ay tariikhdu tahay 17/11/2022.

Guddida Garsoorka:

- | | | |
|----|-----------------------|-----------------|
| 1- | Adam X, Cali axmed | Guddomiye _____ |
| 2- | Maxamed Cumar Geelle | Xubin _____ |
| 3- | C/raxmaan Xasan Nuur. | Xubin _____ |

Kaaliyaha Maxkamadda Sare JSL

“cumar C/wahaab Siciid”